Ajaanibta codsaday ama haysta magan-galyo caalami ah, adeegyadooda caafimaad, waxay uga faa'iidaysan karaan Ceymiska Guud ee Caafimaadka.

Adeegyadaada Caafimaad Waxaad Laga Heli Kartaa

- Wasaaradda Caafimaadka iyo hay'adaha la xiriira ee bixiya adeegyada caafimaad (Xarumaha Caafimaadka Bulshada iyo kuwa la xiriira sida Xarumaha Dayeelka, Muhaajiriinta, Xarumaha Caafimaadka Qoyska, Cisbitaallada iwm.),
- Xarumaha bixiya adeegyada caafimaad ee hoos imaada jaamacadaha dawladda,
- Xarumaha bixiya adeegyada caafimaadka ee gaarka ah (Cisbitaallada jaamacadaha hoos yimaada hay'adaha sama-falka ayaa ka mid ah),
- Xarumaha caafimaad ee ay dhiseen Hay'adaha sama-falka iyo ururada bulshada.

Adeegga caafimaad waa inaad ka qaadataa gobolka laguu oggolaaday inaad degganaato oo adreeskaagu ka diiwaan gashan yahay.

Dawooyinka iyo Farmashiyeyaasha

Dawooyinka waxaa laga heli karaa farmashiyeyaasha heshiiska kula jira Xarunta Kaalmada Bulshada (Social Security Institution)

Xarumaha Wicitaanka iyo La talinta

- 157 (YİMER- Xarunta Xiriirka Ajaanibta)
- 184 (SABİM- Xarunta Xiriirka Wasaaradda Caafimaadka)
- 183 (Xarunta Caawinta ee Wasaaradda Qoyska iyo Arrimaha Bulshada)

Buug-Yaraha Wargelinta Helidda Adeegyada Caafimaad Ee Ajaanibta Magan-Galyada Ku Jooga Dalka Turkiga.

T.C. Sağlık Bakanlığı

T.C. İÇİŞLERİ BAKANLIĞI GÖÇ İDARESİ GENEL MÜDÜRLÜĞÜ

UNHCR The UN Refugee Agency BM Mülteci Örgütü

- Shakhsiyaadka ajaanibta ah ee codsada Ilaalada/magan-galyada caalamiga ah ee aanan laheyn caymis caafimaad iskana bixin karin, Wasaaradda Arrimaha Gudaha Waaxda Guud ee Muhaajiriinta ayaa codsiga kaddib hal bil gudaheeda isagoo ogeysiinaya Xarunta Kaalmada Bulshada (SKG) waxaa loo diiwaan gelinayaa qof leh "Caymiska Guud ee Caafimaadka".
- Shaksiyaadka ajaanibta ah ee leh caymis caafimaad ama iska bixin kara ama codsiga keliya inuu adeeg caafimaad helo darted inuu u sameeyey dib laga ogaado kharashaadka daweynta iyo dawooyinka dib baa looga celinayaa.

Kharashaadka Caymiska Guud ee Caafimaadka ee shakhsiyaadka hoos yimaada ilaalada/magan-galyada caalamiga ah waxaa laga bixinayaa dhanka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Waaxda Muhaajiriinta.

Hadba iyadoo la eegayo adeegga aad ka faa'iideysanayo waxaa laga yaabaa inaad bixiso kharashaadka ka qeyb-galka.

Sababaha Codsada Adeegyada Caafimaad iyo Ku Wareejinta Meel Kale

- Waxaad si toos ah adeeg caafimaad uga codsan kartaa xarumaha caafimaadka ee hoos yimaada Wasaaradda Caafimaadka ee ku yaalla magaalada/gobolka aad deggan tahay.
- Xarumaha caafimaadka gaarka ah iyo kuwa jaamacadaha waxaad codsan kartaa marka laguu wareejiyo ama (iyadoo loo marayo 112 Taliska Xarunta Xaaladaha Degdegga ah) xaaladaha degdegga ah.

Adeegyada Caafimaad Ee Degdegga ah

- Adeegyada caafimaadka ee degdegga, keliya, waxaa la siiyaa bukaannada u baahan wax ka qabad degdeg ah illaa xaalkiisu uu mid xasillan ka noqdo (oo xaaladdii degdegga ahaydna ka dhammaato).
- Adeegga ambalaasta ee 112 waxa uu hoos yimaadaa adeegyada caafimaadka ee degdegga ah.

Adeegyada Aasaasiga ah Ee Caafimaadka

Xarunta Caafimaadka Muhaajiriinta, Xarumaha Caafimaadka ee Tadawuca (Iskaa Wax U Qabso), Xarumaha Adeegyada Caafimaadka Qoyska ayaa laga bixiyaa. Waxaana ka mid ah adeegyadaaas:

- Adeegyada hore ee barista, daweynta iyo la talinta.
- Baaritaanno la xiriira ka hortagga halista cudurrada faafa.
- Adeegyada tallaallada,
- Adeegyo loogu tala-galay yihiin haweenka, hooyada uurka leh, ilmaha yar, caruurta kale iyo kuwa qaan-gaarka ah.
- Adeegyada caafimaad ee la xiriira taranka iyo dhalmada.
- Adeegyada caafimaad ee la xiriira ilaalada faya-qabka nafta iyo maanka, qabatinka maaddooyinka maandooriyeyaasha iyo xallinta dhibaatooyinka nafsiga ah.

Adeegyada aasaasiga ee caafimaadka waxaa lagu bixiyaa si bilaash ah.

Si ay joogto u ahaato adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka, is baddallada ku yimaada adreeska (deegaanka) la ogeysiiyaa xarumaha caafimaadka.